



SOMALI

Waalidoow sharfta leh

Waa inaan is caawinaa – waxaa loo baahan yahay inaan wada shaqeyno

Waqtiyadan dambe waxaa jira iskudhacyo badan oo u dhaxeeyo kooxo dembiileyaal ah. Tiro aad u yar oo dhalinyaro baa ka qaybqaadanaya iskahorimaadkan, kaas oo ugu horeyn ah khilaaf u dhexeeya kooxo dad waaweyn. Waa muhiim in la sii wado dadaalka ah in dhalinyarada laga reebo khilaafkan. Si taas loo gaaro waxaan u baahan nahay caawinaadaada. Waalid ahaan waxaad haysataa fursad aad ilmahaaga kagala hadashid halista uu khilaafkan leeyahay. Hoos waxaad ka aqrisan kartaa talooyin fiican oo ku saabsan sidii aan wadajir uga hortagi karno in caruurta iyo dhalinyarada khilaafkan ka mid ahaadaan.

Talo wanaagsan

Kala hadal ilmahaaga/dhalintaada sida ay u halis tahay khilaafkan taagan.

Xiisee waxuu ilmahaaga ku mashquulsan yahay fiidkii - iyo dadka uu la kulmayo.

Adiga baa masuul ka ah ilmahaaga/dhalintaada inuu dadweynaha ku noqon rabshad ooge.

Hadii aad waalid ahaan ka walaacsan tahay caruurta/dhalinyarada kale waa inaad walacaaga ka wargelisaa adeegyada bulshada.

Hadii aad u baahan tahay talooyin dheeraad ah oo arintan ku saabsan fadlan la xiriir:

Adeega talobixinta dhalinyarada ee magaalada Kopenhagen <https://ungeraadgivning.kk.dk/>

Tani waa talobixin furan oo qarsoodi ah oo loogu talagalay dhalinyarada da'dooda u dhexeeyso 12 – 18 jir.

Booliska Kopenhagen qaybta “Gang Hotline”, telefoon lambar +45 93 50 00 12

Boolisku waxuu sameeyay khad telefoon oo aad ku bixin karto wargelin ku saabsan rabshad oogayaasha waxay geeystaan iyo dhaqdhaqaaqooda. Hadii ay wax degdeg ah jiraan u wac lambarka 112. Hadii ay dhacdu ahayn mid degdeg ah wac lambarka 114. Waaxda boolisku waxay kale oo leedahay app aad ku bixin karto wargelin/tilmaamo.

Adeegu waa 24 saac <https://dognavgten.kk.dk/>, ama telefoon lambarka waa +45 33 17 33 33.

Kani waa adeeg 24 saac oo loogu talo galay qof kasto oo la kulma dhibaatooyinka bulshada oo u baahan feejignaan, maalin iyo habeenba waa lala xiriiri karaa.

